Waaxda Cadaalada ee Mareykanka
Qaybta Xuquuqda Rayidka

Waaxda Waxbarashada ee Mareykanka
Xafiiska Xuquuqda Rayidka

Ogosto 2021

Ka Hortagga Takoorka Ku salaysan Wadanka Laga soo jeedo iyo Xaaladda Socdaalka

Agabyo loogu talagalay Qoysaska iyo Barayaasha

Dugsiyada Dadweynaha waa inay u furan yihiin dhammaan ardayda, laakiin mararka qaarkood ardayda waxay la kulmaan takoor sababta oo ah wadanka ay kasoo jeedaan ama xaaladdood socdaal. Noocyadaan takoorku waxay xaddidayaan marin u helida waxbarasho ee ardayda waxayna ka soo horjeedaa sharciga.

Dhammaan carruurta ku nool Mareykanka waxay xaq u leeyihiin inay iska diwaangaliyaan oo ka qaybgalaan dugsiyada hoose iyo kuwa sare ee dadweynaha iyada oo aan loo eegin xaaladdooda socdaal ama tan waalidkood ama mas'uulkoda.

Waa kuwan waxaad u baahan tahay inaad ogaato:

1. **Degma dugsiyeedka dadweynaha uma diidi karaan inay helaan waxbarasho ilmo kasta iyadoo lagu saleynayo heerka socdaalka.** Waa xadgudub ka dhan ah sharciga federaalka ah in degmooyinku ka mamnuucaan ama ka niyad jabiyaan carruurta inay iska diiwaangeliyaan dugsiyada dadweynaha maxaa yeelay carruurta ama waalidkood ama mas'uuliyiintu ma ahan muwaadiniin Mareykan ah ama ma haystaan dukumeenti socdaal
2. **Dugsiyada Dadweynuhu waa inay siiyaan adeegyo kaalmo luqadeed ah dhammaan ardayda aqoontooda Ingiriisiga xaddidan tahay** oo ay u aqoonsadaan ardaydan inay yihiin bartayaal Ingiriis si dhammaan ardayda ay si macno leh uga qaybgalaan dhammaan barnaamijyada waxbarashada educational programs.
3. **Dugsiyada Dadweynuhu waa inay dadka ku wargeliyaan macluumaadka** ku saabsan is diwaangelinta, fasalada, iyo barnaamijyada kale ee waxbarashada iyo waxqabadyada **luqad ay fahmi karaan dhammaan waalidiinta, mas'uuliyiinta, iyo kafaala-qaadaha**. Dugsiyadu waxay ku fulin karaan tan iyagoo turjumaya macluumaadka ama bixinaya turjumaanno aqoon leh. qualified interpreters.

Marka dugsiyada dadweynuhu diidaan in si siman loo helo waxbarashada sabab lagu salaynayo wadanka uu ardayga kasoo jeedo ama xaaladda socdaalka, Educational Opportunities Section of the Civil Rights Division (Qeybta Fursadaha Waxbarashada ee Qeybta Xuquuqda Rayidka ah) (CRT) ee Maraykanka. Waaxda Caddaaladda iyo Xafiiska Xuquuqda Rayidka ah (OCR) ee Mareykanka. Waaxda Waxbarashadu waxay kaa caawin kartaa hirgelinta sharciyada federaalka ee ka ilaaliya ardayda takoorka. CRT iyo OCR ma weydiin doonaan waalidiinta, mas'uuliyiinta, ama carruurta xaaladda socdaalkooda.



Waaxda Cadaalada ee Mareykanka
Qaybta Xuquuqda Rayidka

Waaxda Waxbarashada ee Mareykanka
Xafiiska Xuquuqda Rayidka

Tusaalooyinka noocyada dhacdooyinka CRT iyo OCR ayaa baari kara:

DIIWAANGELINTA DUGSIGA:

Degmo dugsiyeedku waxay waalidiinta ka rabtaa inay sheegaan haddii iyaga ama carruurtoodu yihiin muwaadiniin Maraykan ah si ay ilmahooda dugsiga ugu diwaangeliyaan. Degmadu waxay diidaa inay aqbasho wax dukumiintiyo ah, sida nuqulada biilasha korontada ama heshiisyada ijaarka, taasoo caddayn u ah in ilmuhu ku nool yahay xuduudaha degmada.

Arday cusub oo doonaya inuu dhigto dugsiga xannaanada wuxuu ku dhashay waddan kale mana haysto shahaadada dhalashada. Dugsigu ma diwaangelin doono ilmaha mana aqbali doono dukumiintiyada kale, sida shahaadada diinta ama isbitaalka oo leh taariikhda dhalashada ilmaha, si loo muujiyo in ilmuhu buuxiyey shuruudaha da'da degmada.

Foomka is-diwaangelinta degmo dugsiyeedka ayaa loogu qoray "Kaarka Sooshiyaal Sikiyuuritiga" inuu yahay dukumenti loo baahan yahay. Marka waalidka ardayga cusub soo booqdo xafiiska dugsiga, waxaa loo sheegaa inay u baahan doonaan inay bixiyaan lambarka sooshiyaal sekiyuuritiga ilmaha ka hor intuusan ilmuhu isdiiwaangelin.

Mas'uulku kuma jiro qolada ama qowmiya ilmahooda ee foomamka iska diwaangelinta dugsiga dadweynaha. Sarkaalka dugsiga wuxuu u sheegaa ilaaliyaha in foomka uusan dhameystirneyn oo ilmuhu aan la diwaangelin karin.

BARTAYAASHA INGIRIISKA IYO BARNAAMIJYADA WAXBARASHADA :

Inta lagu jiro diiwaangelinta dugsiga, degmo dugsiyeedka ma sahamiyo qoysaska ku cusub degmada luuqadaha ay uga hadlaan guriga waxayna ku siiyaan macluumaadka is-diwaangelinta Af Ingiriis kaliya.

Sarkaalka dugsiga wuxuu u sheegaa waalidka arday barta Af Ingiriis oo naafo ah in dugsigu uusan siin karin kaalmada luqadda iyo adeegyada naafada ardayga sababo jadwalka is -khilaafayo awgood.

Degmo dugsiyeedku waxay waalidiinta siisaa macluumaad ku saabsan barnaamijkeeda hibada (gifted) Af Ingiriisiga laakiin uma tarjumto mana u fasirto macluumaadka waalidiinta leh aqoon Ingiriis ee xadidan.

Ka waran haddii Ilmuhu kala kulmo Takoor ku salaysan Xaaladda Socdaalka ama Heerka Aqoontooda Af Ingiriisiga Iska Diiwaangelinta ama Ka Qaybgalka Dugsiyada Dadweynaha?

Waxaad la xiriiri kartaa CRT ama OCR haddii:

- Aad rumaysan tahay in degmo dugsiyeedku isku dayeyo inuu kaa hor istaagto adiga ama qof aad taqaan inaad ilmo ka diwaangelisaan dugsiga iyadoo sababtuna tahay waddanka aad u dhalatay ama xaaladda socdaal. Sharciga federaalku wuxuu u baahan yahay in si siman u wada dhigtaan dugsiyada hoose iyo kuwa sare ee dadweynaha dhammaan ardayda, oo ay ku jiraan ardayda aan u dhalan Maraykanka.
- Aad rumaysan tahay in degmo dugsiyeedku aysan siinayn ilmahaaga ama qof aad taqaan adeegyada luqad ee ay u baahan yihiin. Sharciga federaalku uga baahan yahay degmooyinku inay aqoonsadaan bartayaasha Ingiriisiga oo ay siiyaan adeegyo luqadeed si ay si macno leh uga qaybgalaan barnaamijyada waxbarashada.

Haddii aad la soo xiriirtay dugsiga oo uusan qaadin tallaabooyin wax looga qabanayo welwelkaaga ama aadan ku qanacsanayn inaad u gudbiso cabashooyinkaaga dugsiga, waxaad u gudbin kartaa cabasho Qaybta Xuquuqda Rayidka ah ee Mareykanka. Waaxda Caddaaladda barta civilrights.justice.gov, ama Xafiiska Xuquuqda Rayidka ah ee Mareykanka. Waaxda Waxbarashada barta www.ed.gov/ocr/complaintintro.html (si aad cabasho ugu xareysato Af Ingiriis) ama www.ed.gov/ocr/docs/howto.html (si aad cabasho ugu xaraysato luuqad aan ahayn Af Ingiriis).

Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan ka eeg agabyadan dheeraadka ah:

- Xaashida Macluumaadka: Macluumaadka Xuquuqda Dhammaan Carruurta si ay Iskaga Diwaangeliyaan Dugsiga
- Xaashida Macluumaadka: Xaqiijinta in Barteyaasha Af Ingiriisiga ay si Macno leh oo Siman uga Qaybqaadan karaan Barnaamijyada Waxbarashada